Kaaliyahaaga ee sameynta dardaaranka

The Law Society

Yaa sameysan kara dardaaranka?

Haddii aad ka walaacsan tahay sida laga yeeli doono hantidaada goorta aad dhimatid waa in aad sameysataa dardaaran. Haddii dardaaran la'aan aad dhimatid, dowladda ayaa la wareegi doontaa hantidaada, sidaasi awgeedna waxaa surrtowda in qoyskaaga, qaraabada, saaxibada aysan waxba helin.

Sidoo kale, aad bay muhiim u tahay in dardaaran aad sameysatid haddii aadan xaas lahayn ama aadan lahayn qof kuu diwaan gasahn xaas ahaan (xeer sharci ee farayo in aad la xaq tahay xaaska sharci lagu guursaday) Sharciga si toos ah ma aqoonsano lammaaneyaalshau wada nool sida iyagoo isqaba lehna xaquuq la mid ah sida kuwa sharciga isku guursday, xaasaska iyo kuwa sharci ahaan u wada Hataa haddii sanadyo badan aad wada noolaydeen, xaaskaga aadan guursan waxba kama heli doontid dhaxalkaaga haddii aadan sameysan dardaaraan.

Dardaaranka wuxuu kaloo anfici doonaa carruurta iyo dadka kale ee aad masruufi jirtay ee aan keligooda waxba qabsan karin. Haddii dardaaran aadan sameysan, shaki ayaa ku jiraa cidda dhaxli doonto hantidaada goorta aad dhimatid.

Loyarkaaga ayaa kaala talin doona sida canshuurta dhaxlidda ay u saameyn doonto hantidaada.

Waa in aad ka fiirsataa sameynta dardaaran shraciyeed:

- Dad badan oo aad masruufi jirtay ayaa codsan karaa in lagu wareejiyo gurigaada goorta aad dhimatid;
- Haddii aad dooneysid in ku darted dardaaranka (ama aad ku wareejisidcarruur yar yar ama qof curyaan ah, dhimidda canshuurta aad bixin lahayd ama badbaadinta gurigaada goorta aad dhimitid);
- haddii gurigaada uusan ku yaallin waddanka UK ama aadan ahayn muwaaddinka waddanka Britishka;
- aad halka deggan tahay illaase aad dibadda guryo kale ku leedahay; iyo
- aad adiga iska leedahay qayb ama ganacsi buuxa.

Dardaaranka la sameeyey waxaa beddeli karaa haddii ay isbeddel ku dhacdo noloshaada tusaale – guur, furriin iyo sebereeshan, haddii wada noolaanshaha uu burburay (si sharcui ah)). Taasi waxay macnaheedu tahay waa in goor kasta aad dibu habeyn ku sameysaa dardaarankaaga. Looyarka ayaa kuiu sheegi doonaa waxyaabaha keeni karo dib-u-habeynta.

Adeegsiga looyarka

Inkastoo aad qori kartid dardaaranka, haddana waxaa aad u habboon in aad adeegsatid looyar kuu qoro dardaaranka, waayo waxaad kala kulmi doontaa waxyaabo badan oo sharciga waafaqsan ee loo baahan yahay in uu sameeyo qof sharci yaqaan ah kelito. Haddii aad iska qoratid dardaaranka waxaa suurtowda in aad u qortid si khalad ah, kadibna ay kalifto in reerkaaga uusan helin hantidaada.

Raadinta Looyarka

Haddii aad dooneysid in dardaaran aad sameysid illaase aadan haysan looyar, waxaad eegtaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk/findasolicitor kadibna waxaad eegtaa qaybta 'dardaaranka' (Wills and Probate), waxaadna ka heli doontaa akhbaarta looyarrada xaafaddaada. Ama waxaad soo wacdaa Xafiiska Sharciga Bulshada (Law Society) ee laga helo telefoonka 0870 606 2555.

Waxyaabaha uu looyarkaaga kaaga baahan doono

Goorta aad goo'aansatid looraka aad adeegsan doontid, wuxuu looyarka kaaga baahan doono waxyaabaha soo socda:

Hantidaada

Faafaahinta wax kasta ee aad mulkisid, ayna ka mid tahay guryaha, baabbuur, waxyaabo gaar ah, hantida shirkadaha iyo ganacsi aad ku leedahay iyo beenshankaaga.

Sida loo kala qaybsan doono

Qofka aad dooneysid in hantidaasi aad uga tagtid. Sidee baad hantidaada ugu qaybisaa carruurtaada, qoyskaaga, saaxibbada, qaraabada iyo hay'adaha samafalka? Miyey jiraan shuruudo aad ku xireysid arrimahaasi (tusaale – carruurta da'da yar waa in ay gaaraan da' gaar ah inta aan lagu wareeji lacagta ama hantida aad uga tagtay)?

Qoyska iyo kuwa kale ee ku dhaxli doono

Waa in dardaaranka aad ku magacawdaa qofka fulin doono dardaarankaaga – dadka agaasim doono dardaarankaaga goorta aad dhimatid. Kuwaasina waxay noqon karaan saaxibo ama dad qaraabo ah, ama qof takhsuus ah sida looyarka. Waxaa habboon qof qaraabo ah iyo looyar in ay agaasimaan. Run ahaanti, waxaa habboon in aad magacaabatid qof aqoon u leh arrimaha dhaqaalaha. Maaddaama ay adag tahay mas'uuliyaddu, waa in aad hubsataa in qofka agaasimi doono dardaarankaaga uu ku faraxsan yahay qabashada hawsha aad u xilsaaratay. Waxaa habboon in qofka agaasimi doono uu yahay mid kaa da' yar.

Barbaarin

Haddii goorta aad dhimmatid aad ka tagtid ilmo jira 18 jir ka yar, waa in aad u magacawdaa qof sii barbaariyo.

Waxyaabaha kale ee aad dooneysid

Miyey jiraan waxyaabo ku gaar ahh ee aad dooneysid in lagu sameeyo aaskaaga? Xaggee iyo sidee baad u dooneysaa in laguu aaso goorta aad dhimatid? Miyey jiraan waxyaabo kale? Haddii dooneysid in jidhkaaga, sida keliyaha ama xubnaha kale aad cid ugu deeqdid. Waa in aad ku dartaa dardaarankaaga. Sidoo kale, waa arrin wanaagsan in goor kasta aad jeebka ku qaadatid kaadhka xubin deeqidda.

Qofka fulin doono dardaarankaaga

Waa in dardaaranka aad ku magacawdaa dadka oofin doono doono dardaarankaaga. Waxaad ka dhigan kartaa saaxibbo, qaraabada ama looyarka. Waxaa ugu fiican qof saaxib, qaraabo ah iyo qof takhsuus leh.Waa in aad u doorataa qof ku wanaagsan dhaqaalaha. Waa in aad ku hubsataa in qofka aad ku magacawday uu ku faraxsan yahay hawsha maaddaama ay qaadan karto muddo dheer. Waxaa fiican in qofka aad magacawday uu yahay qof kaa da' yar.

Saxiixidda dardaaranka

Qoraalka dardaaranka marka la qoro waa in kadib la saxiixaa haddii kale aqoonsi ma yeelan doono.waxaa jhiraa habab la raaci karo gooreta saxiixidda illaase haddii aan la raacin way kaa halleyn karaan dardaarankaaga. Dad badan waxay marqaati ka dhigtaan dadka kale ee ay ka wada shaqeeyaan xafiiska ama isla goobta.

Meelaha lagu asturi karo dardaaranka

Aad bay muhiim u ahay in dardaaranka aad ku asturtid meel habboon aadna u sheegtid qofka fulin doono ama qaraabo kale meesha ay si sahlan uga heli karaan dardaaranka haddii ay geeri kugu timaaddo. Sida badan, dadka waxay ka codsadaan looyarkooda in uu meel u dhigo qoraalka dardaarankooda. Looyarro badan ayaa lacag la'aan kuugu hayn doono qoraalka dardaarankaada, ilaase waxaa suurtowd in qaar kale ay lacag yar kaaga qaadan.

Kaaliyahaaga ee sameynta dardaaranka

The Law Society

Dib-u-habeynta dardaarankaaga

Waa in dibuhabeyn aad ku sameysaa dardaarankaaga ugu yaraan shan sanadood kadib, iyo mararka uu ku dhaco isbeddel sida haddii aad guursatay ama xaaskaaga aad kala tagteen, haddii ilmo ay kuu dhashaan ama aad guriga ka guureysid. Goorta isbeddel uu dhaco waxaa habboon in dib u habeyn aad ku sameysid dardaarankaaga. Sidoo kale waad ku dari kartaa waxyaabo yar yar dardaarankaaga, illaase waa in aad looyarkaaga kala tashatid arrintaasi.

Kharashka

Kharashka looyarrada wuu kala duwan yahay. Waxay kaloo ku xiran tahay:

- aqoonta iyo khibradda looyarka; iyo
- sida ay u adag tahay dardaarankaaga.

Inta aad go'aansan looyarka aad adeegsan doontid, waxaa habboon in aad u tagtid dhowr looyarb si aad u ogaatid qiimahooda. Illaase waa in aad ogataa in middka ugu rakhiisan uu yahay midka ug hawl liito. Waxaa kaloo habboon looyar aad u tegi kartid, aadna fahmi kartid wareysigiisa.

Akhbaar dheeraad ah

Tani waa mid ka mid ah xaashiyaha ku saabsan arrimaha adeegyada sharciga ee laga helo looyarrada. Hoos ayey ku qoran yihiin xaashiyaha kale. Waxaad ka heli kartaa looyarkaaga ama waxaad soo weci kartaa Xafiiska Sharciga Bulshada (Law Society) ee 0870 3333 084.

- Kaaliyahaaga ee iibsashada guriga
- Kaaliyahaaga ee sameynta furiinka
- Kaaliyahaaga ee dhibaatooyinka shaqada
- Kaaliyahaaga ee sameynta ganacsiga
- Kaaliyahaaga ee sameynta codsiga magdhowga ee qofka
- Kaaliyahaaga arrimaha dhaqaale ee duqooshinka
- Kaaliyahaaga ee la degidda xaaskaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaaridda gurigaaga
- Kaaliyahaaga ee ijaarashada guriga
- Kaaliyahaaga ee adeegsiga looyarka
- Kaaliyahaaga ee dardaaranka sharciyeed (probate)
- Kaaliyahaaga ee codsiga magangelyada

Waxaad heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran far waweyn, farta baraylka ee indhooleyaasha, iyadoo ku duuban cajaladda maqalka ama CD. Haddaad u baahan tahay mid ka mid ah kuwani, fadlan waxaad nagula soo xiriirtaa iimeylka accessibility@lawsociety.org.uk ama kala xoo xiriir telefoonka 0870 606 2555.

Waxaad kalood heli kartaa xaashiyahani oo ku qoran luqado kala duwan. Waxaad ka daalacan kartaa boggeena intarneetka ee www.lawsociety.org.uk.

Lexcel

Look for Lexcel - the mark of excellence

The Law Society 113 Chancery Lane London WC2A 1PL Telefoonka: 020 7242 1222 www.lawsociety.org.uk

Inkastoo aanu ku dadaalnay tebinta akhbaar hufan, haddana ogsoonow, goor kasta qaynuunka iyo sharciga isbeddel ayaa lagu sameeyaa taasi oo qof kasta si gaar ah u saameyso. Xaashidani kuma saabsano akhbaar ama talobixinta shaqsiyaad gaar ah, sidaasi awgeedna mas'uul kama aanu nihin wixii dhibaato ah ee ka yimaaddo akhbaarta xaashidani.

Designed by dmlmarketing.co.uk Version 2, 2007 Your guide to making a will - Somali